DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD

ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

| SANADKA 20AAD | CADADKA 9AAD | TAARIIKH: 12/15/20 | Lam. 05 |
|---|---|---|---|

FAAFINTA RASMIGA AH

OFFICIAL GAZETTE

الجريدة الرسمية

# WAX-KA-BEDELKA SHARCIGA ISGAARSIINTA

| TUSMADA | |
|---|---|
| Qeybta 1aad | *Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah*<br>**WAX-KA-BEDELKA SHARCIGA ISGAARSIINTA** |
| Qeybta 2aad | *Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.*<br>*WAXBA MALEH* |
| Qeybta 3aad | *Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.*<br>*WAXBA MALEH* |
| Qeybta 4aad | Go'aanadda Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha.<br>WAXBA MALEH |
| Qeybta 5aad | Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda.<br>WAXBA MALEH |

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

2DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

XAFIISKA
MADAXWEYNAHA

ولاية بونت لاند
الصومالية

مكتب
الرئيس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Sharci Lr.5 ee December 15, 2020, kuna saabsan Wax-ka-beddelka Sharciga Isgaarsiinta Dowladda Puntland.**

**Madaxweynaha Dowladda Puntland**

**Markuu arkay:** Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80$^{aad}$ farqadiisa 16-$^{aad}$ iyo Qodobka 35-$^{aad}$.

**Markuu arkay:** Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/122/2020, kuna taariikhaysan December 9, 2020.

**Markuu tixgeliyey:** Muhiimada Xeerkani u leeyahay horumarinta Isgaarsiinta iyo wacyigelinta Bulshada.

**Wuxuu soo saaray**

Sharciga soo socda:

**Qodobka 1$^{aad}$**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen **Wax-ka-beddelka Xeerka Isgaarsiinta Dowladda Puntland.**

**Qodobka 2$^{aad}$**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda

**Qodobka 3$^{aad}$**

Dhaqangal Sharcigani wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland

**Siciid Cabdullaahi Deni**
Madaxweynaha Dawladda Puntland

**DAWLADDA PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**
**GOLAHA WAKIILLADA**

**ولاية بو نت لاند الصومال**
**مجلس النواب**

**Xafiiska Guddoomiyaha**
**Office of the Speaker**

**Tix:-XGGW/DPL/122/2020 Garoowe, Arbaca , Taariikh:- 09/12/2020**

**Ku:- Madaxweynaha DPL** **Garoowe**

**Ujeeddo:-** **<u>Ansixinta Wax-ka-bedelka Xeerka Isgaarsiinta Puntland</u>**
**<u>Mudane Madaxweyne,</u>**

**GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU: -**

**MARKUU ARKAY:-** Dastuurka Dawladda Puntland Qodobka **64**-aad

**MARKUU ARKAY:-** Soo gudbinta K/S Madaxweynaha ahna Madaxweyne ku-xigeenka DPL XMWK/DPS/144/2020 ee October, 12, 2020 kuna saabsanaa wax-ka-bedelka Xeerka Isgaarsiinta Puntland.

**MARKUU ARKAY: -** Baahida loo qabo Wax-ka-bedelka iyo kaabista Xeerka Isgaarsiinta Puntland.

**MARKUU TIX-GELIYEY:** Muhiimadda ay leedahay in xeer lagu maamulo loo sameeyo Shirkadaha bixiya adeegga Isgaarsiinta oo ka hawl-gala deegaannada Puntland.

**MARKUU DHEGEYSTEY: -** Dooddii iyo go'aankiii Golaha Wakiilladu ku ansixiyey Kalfadhiga 47-aad Fadhigiisii 13-aad ee **14/11/2020** Wax-ka-bedelka Xeerka Isgaarsiinta Puntland oo ay fadhiyeen **38** xubnood oo ka mid ah mudanayaasha Golaha Wakiillada.

**MARKUU ARKAY: -** Go'aankii GolahaWakiilladu ay cod aqlabiyad ah (**36**) Mudane oo gacan taag ah ku ansixiyeen Wax-ka-bedelka Xeerka Isgaarsiinta Dawladda Puntland, halka uu diidey (1) Mudane, kana aamusay (1) mudane.

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

**Ansixinta Wax-ka-bedelka Xeerka Isgaarsiinta Dawladda Puntland.**

**Wada Shaqeyn Wacan**

**Md. Cabdirashiid Yuusuf Jibriil**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

XAFIISKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADA DAWLADDA PUNTLAND
OFFICE OF THE SPEAKER OF PUNTLAND STATE HOUSE OF REPRESENTATIVES

**DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA**

**GOLAHA WAKIILLADA PUNTLAND**

---

# WAX-KA-BEDELKA XEERKA ISGAARSIINTA DAWLADDA PUNTLAND

---

**GAROOWE, NOFEEMBAR, 2020**

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## TUSMO

**Bogga**


QODOBKA 1-AAD Nidaamka Guud Eray Bixin---2
Qodobka 2-aad Magaca Xeerka ---3
Qodobka 3-aad Ujeeddada Xeerka ---3
Qodobka 4-aad Baaxadda Xeerka ---3
Qodobka 5-aad Xilka iyo Waajibaadka Wasaaradda ---3
Qodobka 6-aad Naqshadayn ---4
Qodobka 7-aad Buugga Lambarada Wicitaanka( Directory Book) ---4
Qodobka 8-aad Oggolaanshaha Taawarada Isgaarsiinta ---5
Qodobka 9-aad Machadyada Isgaarsiinta ---5
Qodobka 10-aad Sanduuqa Xarkaha ( Cable Box) ---5
Qodobka 11-aad Soo Saarista Xeer-nidaamiyeyaal ---5
Qodobka 12-aad Dalabka Xogta Amniga ---6
Qodobka 13-aad Wada tashiga wasaaradda iyo shirkadaha isgaarsiinta ---6
Qodobka 14-aad Habka Go'aan qaadashada ---6
Qodobka 15-aad Dib-u-eegista Go'aanka ---7
Qodobka 16-aad Maamulka Hirarka ---7
Qodobka 17-aad Xarigga Fiber Optic ---8
Qodobka 18-aad Ruqsadaha ---8
Qodobka 19-aad Shuruudaha Codsiga Ruqsada ---8
Qodobka 20-aad Cusboonaysiinta Ruqsadda ---9
Qodobka 21-aad Katanaasullidda ama dib-usoo celinta Ruqsadda ---9
Qodobka 22-aad Kala noqoshada Ruqsadda ---9
Qodobka 23-aad Codsiga Isku-xirka shabakadaha adeegga isgaarsiinta ---9
Qodobka 24-aad Shuruudaha isku-xirka shabakadaha adeegga isgaarsiinta ---10
Qodobka 25-aad Xeer nidaaminta isku xirka shabakadaha adeegga isgaarsiineed ---10
Qodobka 26-aad Qoondaynta iyo Bixinta lambarada ---11
Qodobka 27-aad Diidmada Codsiga Bixinta lambarada ---11
Qodobka 28-aad Xeer nidaaminta lambarada ---11
Qodobka 29-aad Xuquuqda Shirkadaha iyo Maalgashadayaasha ---12
Qodobka 30-aad Oggolaansha qalabka isgaarsiinta ---12
Qodobka 31-aad Xaqa Marinka Adeeg Bixiyaha ---12
Qodobka 32-aad Helitaanka Adeeg Isgaarsiineed oo Baahsan ---12
Qodobka 33-aad Tartanka suuqa Xorta ah ee Isgaarsiinta ---13
Qodobka 34-aad Ku takrifalida awoodda suuqa ---13
Qodobka 35-aad Faafreebka ---13
Qodobka 36-aad Diiwaangalinta-lafta (Sim card) ---14
Qodobka 37-aad Hirgalinta Xeerkan ---14
Qodobka 38-aad Ganaax ---14
Qodobka 39-aad Iska hor-imaadka Danaha Isdiidan ---15
Qodobka 40-aad Burin ---15
Qodobka 41-aad Dhaqan-galka ---15




GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## QODOBKA 1^-aad^

## Erey Bixin

1. **Xeer:** Waxaa loola jeedaa Xeerka Isgaarsiinta Dawladda Puntland.
2. **Isgaarsiin:** Waxaa loola jeedaa adeeg kasta oo Isgaarsiineed oo uu bixiyey adeeg bixiye oggolaansho ka haysta Wasaaradda si waafaqsan xeerkan.
3. **Wasaarad:** Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Warfaafinta, Isgaarsiinta iyo Dalxiiska Puntland.
4. **Wasiir:** Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta, Isgaarsiinta iyo Dalxiiska Puntland.
5. **Shirkad Wadani ah:** Waxaa loola jeedaa shirkad Isgaarsiineed oo ay leeyihiin muwaadiniin/ muwaadin Soomaaliyeed oo sifo xeerkan waafaqsan loogu oggolaaday inay bixiso adeeg Isgaarsiineed.
6. **Shirkad Ajnebi ah:** Waxaa loola jeedaa Shirkad ajnebi ah oo sifo xeerkan waafaqsan loogu oggolaaday inay bixiso adeeg Isgaarsiineed.
7. **Ruqsad:** Waxaa loola jeedaa oggolaansho ay bixisay Wasaaraddu si waafaqsan xeerkan.
8. **Hirarka raadiyaha isgaarsiinta**: Waxaa loola jeedaa qayb ka mid ah mowjadaha raadiyaha ee Wasaaraddu u qoondayso adeegyadda isgaarsiinta madaxa-bannaan, Idaacadaha iyo Telefishinada (Muuqaal-baahiye).
9. **Furaha Qaranka (national code)**: Waxaa loola jeedaa **(252)** oo ah Hanti Qaran.
10. **Summadda Qaranka (domain):** Waxaa loola jeedaa **(.So)** oo ah Hanti Qaran loona adeegsado Internet-ka.
11. **Fiber- optic**: Waxaa loola jeedaa dhagaatiyada xambaara internet-ka iyo hirarka isgaarsiinta ee casriga ah.
12. **Adeeg bixiye:** Waxaa loola jeedaa Shirkad ay oggolaansho u siisay Wasaaraddu inay bixiso adeeg Isgaarsiineed si waafaqsan xeerkan.
13. **Taawar (tower):** Waxaa loola jeedaa biraha dhaadheer ee waddooyinka iyo buuraha ka taagan miyi iyo magaalo kuna xiran yihiin dhiishashka ama durbaannada (Drams) ama Anteenooyinka Mobil-ka (BTS) iyo qalab kale sida Micro-wave IWM.
14. **Laamaha Shirkad Isgaarsiineed:** Waxaa loola jeedaa xarumaha Shirkadda ee heer degmo iyo heer gobol.
15. **V-sat:** Waxaa loola jeedaa saxan (dhish) yar oo isgaarsiinta loo isticmaalo inuu Intarnet ama xog (Data) ka keeno Sataleyt-ka (Satellite), isagoo ka soo qaadaya xarun kale loona isticmaalo guryaha ama xafiisyada.
16. **Cable BOX:** Waxaa loola jeedaa saxamo ku xiran satellite-ka oo la isku urкурshay lagana dhigo Santuukh laga daawado Kannaallada TV-ga sida Ciyaaraha, Wararka iwm.
17. **Maxkamadda awoodda u leh:** Waxaa loola jeedaa maxkamadda awoodda dhanka maadada iyo xuduudka u leh qaadista dacwada.
18. **WHO:** Waxaa loola jeedaa Hay'adda Caafimaadka Adduunka.
19. **ITU:** Waxaa loola jeedaa Ururka Caalamiga ah ee Isgaarsiinta.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 2-aad
## Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa Xeerka Isgaarsiinta Dawladda Puntland.

## Qodobka 3-aad
## Ujeeddada Xeerka

Ujeeddooyinka xeerkan waxaa ka mid ah;

1. Inuu horumariyo siyaasadda isgaarsiinta iyo tiknoolojiyada DPL.
2. In lagu nidaamiyo laguna maamulo dhammaan qaybaha Isgaarsiinta, War-baahinta, Boostooyinka iyo Madbacadaha ee ka jira degaannada Dawladda Puntland.
3. Tayaynta adeegyada Isgaarsiinta iyo wada shaqaynta shirkadaha.
4. Horumarinta Isgaarsiinta casriga ah si kor loogu qaado wacyiga bulshada iyo isticmaalka adeegyada intarnetka.
5. Ilaalinta xogta gaarka ah ee qofka.
6. Maamulka, horumarinta iyo qaybinta isticmaalka dhammaan hirarka Isgaarsiinta.
7. Abuurista suuq xor ah iyo tartan furan ee adeegayada Isgaarsiinta.
8. Bixinta ruqsadaha Isgaarsiinta si waafaqsan xeerkan.
9. Dhiiri-gelinta maalgashiga Isgaarsiinta, iyadoo la tix-gelinayo Shirkadaha wadaniga ah.
10. Inuu kor u qaado koboca dhaqaalaha Puntland.
11. Ilaalinta xuquuqda shirkadaha Isgaarsiinta iyo adeegyada la xiriira.

## Qodobka 4-aad
## Baaxadda Xeerka

Xeerkan waxaa lagu maamulayaa dhammaan shirkadaha Isgaarsiinta ee ka jira degaannada Puntland, marka laga reebo Isgaarsiinta ay isticmaalaan ciidamadu.

### Qodobka 5-aad
### Xilka iyo Waajibaadka Wasaaradda

Wasaaraddu waxay u xil-saaran tahay;

1. Diyaarinta soo bandhigidda siyaasadda guud iyo qorshaha Isgaarsiinta Puntland, iyadoo la tashanaysa dhinacyada ay khusayso.
2. Horumarinta istaraatiijiyada siyaasadeed ee lagu fidinayo baaxadda adeegga Isgaarsiinta, si kor loogu qaado koboca dhaqaalaha Puntland.
3. Dhisidda macaahid lagu barto culuumta Isgaarsiinta si ay uga faa'iidaystaan shaqaalaha dawladda, shirkadaha Isgaarsiinta iyo dhammaan bulshada Puntland.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

4. Kormeeridda iyo la xisaabtanka shirkadaha Isgaarsiinta, hay'adaha War-baahinta, Boostooyinka iyo Madbacadaha.
5. Ku wacyigelinta bulshada macluumaadka aqooneed ee ku saabsan Isgaarsiinta, helidda aqoonta tiknolojiyadda casriga ah, ka qaybqaadashada kobcinta dhaqaalaha, horumarinta iyo sare u qaadidda ilbaxnimada bulshada.
6. Ilaalinta habsami u socodka adeegga Isgaarsiinta iyo internetka.
7. Wasaaraddu waxay mas'uul ka tahay maamulidda adeegyada Isgaarsiinta sida qorshaynta, bixinta ruqsadaha, qoondaynta isticmaalka hirarka Raadiyaha, Tv-yada, mobile-ka, internetka, xeer-nidaamінta iyo Isgaarsiinta kale ee dalka.
8. Soo jeedinta canshuuraha la-xiriira maaraynta hirarka, isku-xirka iyo la socodka shabakadaha iyo adeegyada Isgaarsiineed.
9. Soo saarista xeer-nidaamiyeyaal lagu hago hawlaha Isgaarsiinta, iyadoo la tashaneysa shirkadaha Isgaarsiinta.
10. Xallinta khilaafaadka shirkadaha Isgaarsiinta, iyadoo u saaraysa guddi farsamo oo dhexdhexaadiya.
11. Wasaaraddu waxay qaadanaysaa tallaabooyinka lagama-maarmaanka u ah si loo xakameeyo ciddii jebisa ama ku xadgudubta xeerkan.
12. Oggaanshaha agab kasta oo Isgaarsiineed, War-baahineed, Boosto ama madbacad ee ka soo gala dekedaha, garoomada diyaaradaha iyo baraha kaantaroolada si loo hubiyo tayada qalabkaas.
13. Shirkad kasta oo Isgaarsiineed waxay bil kasta u gudbineysaa Wasaaradda iyo Wasaaradda Maaliyadda xisaab-xirka shirkadda oo ka kooban dakhli, kharash iyo mushaharka shaqaalaha si Wasaaradahaasi ula socdaan.

## Qodobka 6-aad

## Naqshadayn

1. Shirkad kasta oo Isgaarsiineed iyo cid kasta oo xarig (cable) dhulka marineysa ha u jiideyso meel dhow ama meel dheer, waa iney Waasaaradda u soo gudbisaa naqshadda (design), si looga fogaado in aaney shirkadi shirkad kale xarkeheeda waxyeelo u geysan ama dusha ka marin iyo in aaney waxyeelo u geysan meelaha muhiimka ah sida, buundooyinka, waddooyinka laamiga ah iwm.
2. Shirkad kasta oo waxyeelo u geysata hantida dawladda iyo midda gaarka loo leeyahay ama deegaanka, waxay bixinaysaa mag-dhaw u dhigma waxyeelada ay geysatey.

## Qodobka 7-aad

## Buugga Lambarada Wicitaanka (Directory Book)

Shirkad kasta oo Isgaarsiineed waa inay Wasaaradda iyo ciddii kale ay khusayso u soo gudbiyaan diiwaannada lambarada muhiimka ah ee adeegga bulshada hadba kan ugu dambeeya si loo helo lambarada gurmadka deg-dega ah sida dab-damiska, laamaha amniga, caafimaadka iwm.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 8-aad

## Oggolaanshaha Taawarada Isgaarsiinta

1. Shirkad, Idaacad ama Telifishan (TV) iyo cid kasta oo taawar (tawer) ama anteeno ka taagaysa meel ka mid ah dhulka Puntland waa inuu oggolaansho (ruqasad) ka haysto Wasaaradda.
2. Shirkad, Idaacad ama Telefishan (TV) iyo cid kasta oo taawar ama anteeno ka taageysa meel ka mid ah dhulka Puntland in ka badan 15m waa in ay madaxa sare ee taawarka ama anteenada ku xirto nalka cas (Guduudan) si ay uga digtoonaadaan diyaaradaha habeenkii joogga hoose ku duulaya loogana fogaado iney waxyeelo u geystaan diyaaradahaas.
3. Wasaaraddu waxay hubineysaa in meesha laga taagayo anteenada ama taawarka ay tahay mid ku habboon iyo tayada qalabkaas, si looga fogaado waxyeelada caafimaad ee ka dhalan karta.
4. Shirkad, Idaacad, Telefishan iyo cid kasta oo u hoggaansami weyda arrimaha ku xusan faqradaha 1-aad iyo 2-aad ee qodobkan waxay mutaysanayaan ganaax lacageed oo ay Wasaaraddu jaangoysey kuna soo saartay xeernidaamiye.
5. Wasaaraddu waxay hubinaysaa masaafada ay isu jirsanayaan taawarada Isgaarsiintu in aanay ka yaraan Hal Kiilo Miter (I KM).

## Qodobka 9-aad

## Machadyada Isgaarsiinta

Machadyada culuumta Isgaarsiinta ee ka hawl-gala Puntland waa inay iska diiwaan-geliyaan Wasaaradda.

## Qodobka 10-aad

## Sanduuqa Xarkaha (Cable Box)

1. Shirkadaha ku shaqaysta adeegga sanduuqa xarkaha (cable Box) waa inay iska diiwaan-geliyaan Wasaaradda.
2. Waxaa reeban in shirkadaha ku shaqaysta adeegga ku xusan farqada 1-aad ay soo samaystaan qalabka, iyagoo aan loo qoondayn hirarkii ay isticmaali lahaayeen si aysan u gelin hirar hore loogu qoondeeyey shirkad kale.

## Qodobka 11-aad

## Soo Saarista Xeer-nidaamiyeyaal

1. Wasaaraddu iyadoo la tashanaysa shirkadaha Isgaarsiinta waxay soo saaraysaa xeer-nidaamiyeyaal ay kula dhaqmayso shirkadaha Isgaarsiinta sida;

b) Ilaalinta Caafimaadka oo saldhig looga dhigayo heerarka Caalamiga ah ee WHO iyo ITU.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

t) Anshaxa iyo dhaqanka oo saldhig looga dhigayo Shareecada Diinta Islaamka iyo dhaqanka suuban ee Soomaaliyeed.
j) Hab-dhaqanka shirkadaha iyo ilaalinta ku xad-gudubka xeerkan.

## Qodobka 12-aad
## Dalabka Xogta Amniga

Laamaha amniga iyo nabadgelyada ee leh awoodda daba-galka Dawladda Puntland, waxay xaq u leeyihiin inay shirkadaha Isgaarsiinta ka helaan wixii xog ah ee khuseeya arrimaha amniga iyo nabadgelyada, iyadoo la dhawraayo xuquuqda xogta macmiilka loona marayo sifo sharci ah.

## Qodobka 13-aad
## Wada-tashiga Wasaaradda iyo Shirkadaha Isgaarsiinta

Wasaaraddu waxay qabanaysaa: -

b) Wada-tashi ka kooban dhinacyada Wasaaradda iyo shirkadaha isgaarsiinta, sannadkiiba laba jeer.
t) Wada-tashi daah-furan si loo gaaro qorshaha dawladdu ka leedahay siyaasadda guud ee Isgaarsiinta, loogana wada shaqeeyo danta guud iyo kalsooni dhex-marta dawladda iyo shirkadaha Isgaarsiinta, haddii ay Wasaaraddu u aragto inaan looga maarmi karin shirkadaha.
j) Tallooyinka ka soo baxa wada-tashiga Wasaaraddu waxay shirkadaha Isgaarsiinta siinaysaa tix-gelin hadba baahidii laysla gartay iyadoo la waafajinayo xeerkan.

## Qodobka 14-aad
## Habka Go'aan Qaadashada

1. Wasaaraddu waxay qaadanaysaa door dhexdhexaadin haddii khilaaf ama isqabad uu soo kala dhex galo shirkadaha Isgaarsiinta iyadoo dhegaysanaya dhinacyada is haya.
2. Arrin kasta oo hortaala Wasaaraddu waxay ka soo saari kartaa jawaab qoraal ah, taas oo lagu sharaxayo sababaha tallaabooyinka ay u qaaday iyo in ay ku salaysan tahay xaqiiqada macluumaadka horyaal.
3. Wasaaraddu waxay diidi kartaa talaabo kasta ama codsi kasta oo aan waafaqsanayn xeerkan iyadoo sababaynaysa. Ciddii aan ku qancin go'aanka Wasaaradda waxay dacwadeeda u gudbin kartaa Maxkamadda awoodda u leh.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 15^-aad

## Dib-u-eegista Go'aanka

1. Cid kasta oo dhibbane ku noqotay sabab la xiriirta go'aannada ay gaartay Wasaaraddu, wuxuu ka codsan karaa Wasaaradda in ay dib-u-eegis ku samayso go'aankeedii hore.
2. Dhammaan xaaladaha lagu codsanayo dib-u-eegista waxay Wasaaraddu bixinaysaa ogaysiis oo ay ku gaarsiinayso cidda ay khusayso in go'aankii ay horay u gaartay Wasaaraddu dib-u-eegis laga codsaday iyadoo tix-galinaysa dhammaan dhinacyada ay khusayso.
3. Cid kasta oo ku qanci weyda go'aanka Wasaaradda wuxuu u dacwoon karaa maxkamadda awoodda u leh.

## Qodobka 16^-aad

## Maamulka Hirarka

Wasaaraddu iyadoo gudanaysa xilkeeda ku saabsan maamulka hirarka waxay mas'uul ka tahay arrimaha soo socda: -

1. Dhiiri-gelinta in loo isticmaalo hirarka ama mawjadaha si nidaam iyo beekhaamin cilmiyeysan leh, si rukhsadda adeeg bixiyaha la siiyey ugu filaato qoondada hirarka ku aaday.
2. Wasaaraddu waxay qorshaynaysaa, isla markaasna maamulaysaa shaxda qoondaynta iyo bixinta hirarka si waafaqsan xeerkan.
3. Wasaaraddu waxay aqoonsanaysaa hirarka isgaarsiinta ee ay shirakdaha hadda jira hore u isticmaali jireen iyada oo la waafajinayo xeerkan.
4. Wasaaraddu waxay u qoondaynaysaa/siinaysaa hirarka isticmaalayaasha soo socda;
   b) Hay'adaha Amniga.
   t) Dab-damisyada iyo Badbaadada Dadweynaha.
   j) Hay'adaha Warbaahinta.
   x) Shirkadaha Isgaarsiinta.
5. Wasaaraddu waxay xaqiijineysaa adeeg bixiyayaasha ruqsadda leh;
   b) Inay ka qayb qaataan adeeg bixiyaasha ka ganacsada Isgaarsiinta kobcinta dhaqaalaha dalka iyo horumarinta Isgaarsiinta.
   t) Khidmadaha laga qaado adeeg bixiyeyaasha waxaa lagu shubayaa khasnadda guud ee dawladda Puntland si waafaqsan xeerka Maamulka Maaliyadda PL.



CARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 17-aad

## Xarigga Fiber Optic

Shirkad kasta oo Isgaarsiineed oo doonaysa in ay soo jiidato oo ay keento dhulka Dawladda Puntland Xarigga Fiber Optic waa in ay fasax ka qaadataa Wasaaradda inta aysan soo jiidan ka hor.

## Qodobka 18-aad

## Ruqsadaha

1. Shirkad kasta oo ka shaqaysanaysa adeeg la xiriira Isgaarsiin, Warfaafin, Dhaqan iyo Dalxiis waa inay qaadataa ruqsadda (Shatiga) Wasaaradda.
2. Shirkad kasta oo Shatiga qaadata, waa inay iska bixisaa khidmadaha kale ee ku waajibay.
3. Qofna kuma shaqaysan karo shabakad Isgaarsiineed, isagoo isticmaalaya hirarka raadiyaha ee Isgaarsiinta, saldhig warbaahin ama bixin adeeg isgaarsiineed, asagoo aan u haysan ruqsad.
4. Ruqsadlaha aan isticmaalin ama aan ku shaqaysan ruqsadda adeeggii uu u qaatay mudo sannad gudihiis ah way ka dhacaysaa ruqsaddu.
5. Wasaaradu waxay ruqsad siinaysaa ciddii ka soo codsata, isla markaana buuxisa shuruudaha ku waajibey.
6. Ruqsadda ay bixisay Wasaaraddu si waafaqsan xeerkan laguma wareejin karo, lagamana iibin karo qayb ama dhammaan shakhsi ama shirkad kale, iyadoo aan oggalaansho qoraal ah laga helin Wasaaradda.
7. Ruqsadda guud waxaa la siinayaa codsadaha marka uu buuxiyo shuruudaha loo dejiyey, iyadoo Wasaaraddu ka dalban karto xog dheeraad ah.
8. Codsaduhu wuxuu buuxinayaa foom-ka ruqsadda guud ee Wasaaraddu diyaarisay.
9. Muddada ruqsadda guud ee adeeg bixiye isgaarsiineed waxaa lagu nidaaminayaa xeer-nidaamiyaha Wasaaradda.

## Qodobka 19-aad

## Shuruudaha Codsiga Ruqsadda

Shirkad kasta oo doonaysa in Wasaaraddu oggolaansho u siiso bixinta adeeg Isgaarsiineed waxay soo gudbineysaa codsi ay ku lifaaqan yihiin;

1. Magaca Shirkadda oo dhammaystiran.
2. Nooca adeeg ee ay bixineyso.
3. Xogta iyo sharciyadda shirkadda (Profile).
4. Hantida shirkadda iyo baaxadda ay ka hawl-gelyso.
5. Qoraal caddaynaya in shirkaddaasi u hoggaansami doonto qawaaniinta iyo nidaamka Dawladda Puntland.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 20-aad
## Cusboonaysiinta Ruqsadda

1. Wasaaraddu waxay cusboonaysiinaysaa ruqsad, markuu ruqsadluhu soo codsado una hoggaansamo dhammaan shuruudihii hore ee lagu siiyey rukhsadda sida ku cad xeerkan.
2. Haddii ruqsaddu ay ka dib dhacdo wakhtigii loogu tala galay in loogu cusboonaysiiyo rukhsadlaha, waxaa loo tix-gelinayaa duruufaha keeni kara dib-u-dhac sababaysan, haddii la waayo sabab cad wuxuu mudan doonaa ganaax sida ku cad xeer-nidaamiyaha Wasaaradda.
3. Haddii ay dhacdo in Wasaaraddu cusboonaysiin waydo codsigaas, rukhsadlahu wuxuu wadan karaa hawlihiisa shaqo si waafaqsan shuruudihii hore loogu siiyey ilaa inta Wasaaraddu ka gaarayso go'aanka cusboonaysiinta.
4. Mar kasta oo Wasaaraddu qaadanayso go'aan diidmo cusboonaysiin, ama ay saarayso ganaax rukhsadluhu jabiyey shuruudihii lagu siiyey rukhsadda si waafaqsan xeerkan, Wasaaraddu waxay ka gaaraysaa go'aan, iyadoo ku soo gudbinaysa hab qoraal ah.

## Qodobka 21-aad
## Ka-tanaasullidda ama Dib-usoo Celinta Ruqsadda

Rukhsadluhu wuxuu Wasaaradda dib ugu soo celin karaa rukhsada uu qaatay, waxayna hirgelaysaa waqti walba oo ay Wasaaradu ka hesho qoraalka rasmiga ah rukhsadlaha.

## Qodobka 22-aad
## Kala Noqoshada Ruqsadda

Wasaaraddu waxay amar qoraal ah ku hakin kartaa ama ka soo ceshan kartaa rukhsaddii ay bixisay marka ay dhacaan xaaladaha soo socda;

1. Haddii rukhsadluhu fulin waayo xeerkan iyo xeer-nidaamiyeyaasha ay soo saartay Wasaaraddu, bixinna waayo khidmadda ku waajibtay ama ganaax lagu saaray ku xad-gudubka xeerka Isgaarsiinta.
2. Haddii uu ku qanci waayo ruqsadluhu go'aanka Wasaaradda ee ku saabsan kala noqoshada ruqsada wuxuu u dacwoon karaa maxkamadda awoodda u leh.

## Qodobka 23-aad
## Codsiga Isku-xirka Shabakadaha Adeegga Isgaarsiinta

1. Isku xirka adeegga Isgaarsiinta talefoonnada waa dan guud, waxaana lagama-maarmaan ah in laysu furo khadadka shirkadaha kala duwan ee ka ganacsada adeegga talefoonnada, si loogu sahlo bulshada inay wada xiriiri karaan, iyagoo shirkado kala duwan isticmaalaya.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

2. Haddii adeeg bixiye Isgaarsiineed oo leh rukhsad adeeg uu ka codsado isku xirka shirkad kale oo adeeg Isgaarsiineed bixisa waxaa la waafajinayaa Xeerka Isgaarsiinta iyo heshiiska u dhexeeya labada shirkadood.

## Qodobka 24-aad
## Shuruudaha Isku-xirka Shabakadaha Adeegga Isgaarsiinta

1. Dhammaan heshiisyada isku-xirka shirkadaha Isgaarsiintu galaan wuxuu noqonayaa qoraal, waxaana heshiis walba laga diiwaangelinayaa Wasaaradda.
2. Dhinacyada galay heshiiska isku xirka kama bixi karaan heshiiskooda ayagoon ka haysan oggolaansho qoraal ah Wasaaradda.
3. Haddii ay dhinacyadu gaari wayaan go'aan la isku raacsan yahay, Wasaaraddu waxay dhexdhexaadin iyo isu soo dhawayn ka galaysaa arrinta laysku hayo, iyadoo mudnaan la siinayo danta guud loona marayo sifo sharci ah.
4. Haddii dhexdhexaadinta Wasaaradda dhinacyada dhinac ka mid ku qanci-waayo, wuxuu uga dacwoon karaa Maxkamadda awoodda u leh.
5. Haddii shirkadi bixin wayday lacagta lagu yeeshay ee ka dhalatay isku xirka shirkadaha muddo 24-maalmood ah waxay waayeysaa xiriirka isku xirka shirkadaha, waxaana lagu dhaqayaa xeer- nidaamiyaha Wasaaradda.
6. Waa in laga heshiiyaa hawlgalka ka hor qodobadan.
   b) Inuu cad yahay Baaxadda isku xirka (Inter-connection)
   t) Inuu cad yahay qiimaha isku xirka daqiiqaddii.
   j) Inaan qiimaha isku xirka lagu tartami karin.

## Qodobka 25-aad
## Xeer Nidaaminta Isku-xirka Shabakadaha Adeegga Isgaarsiineed

1. Wasaaraddu waxay samayn kartaa xeer-nidaamin la xiriirta isku-xirka shirkadaha oo qeexaysa arrimaha soo socda: -

b) Wakhtiga iyo wada xaajoodka gunaanadka heshiiska isku-xirka.
t) Tayada iyo heerka adeegga.
j) Habraaca loo qaadayo tariifada.
x) Xafididda lahaanshaha gaarka ah.
kh) Xafididda xogaha ganacsiga.
d) Fududaynta isku-xirka dhinacyada.
r) Isu soo dhawaynta iyo dhexdhexaadinta qiimaha isku-xirka marka ay dhinacyadu ku heshiin waayaan.



CARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 26-aad
## Qoondaynta iyo Bixinta Lambarada

1. Wasaaraddu waxay qoondaynaysaa qaabka loo isticmaalayo lambarada dalka, sidaa darteed shirkad kasta oo Isgaarsiineed waxay soo codsanaysaa in le'eg baahideeda, waxayna xaq u leeyihiin inay helaan lambaro baahidooda ku filan.
2. Waxaa reebban in la isticmaalo lambarada Qaranka, iyadoo aan la haysan ruqsad ay bixisay Wasaaraddu.

## Qodobka 27-aad
## Diidmada Codsiga Bixinta Lambarada

1. Xeerkani wuxuu qeexayaa habka diidmada qayb ama dhammaan codsi la xiriira isticmaalka lambarada iyo diiwaangelinta magaca shabakadaha bixiya adeegga internet-ka haddii ay dhacaan arrimaha soo socda;

b) Haddii codsaduhu aanu haysan rukhsad uu ku bixin karo adeegga isgaarsiinta iyo internet-ka.
t) Haddii ujeedada isticmaalka lambarada la soo codsaday ay halis ku yihiin jiritaanka Shirkadaha Isgaarsiinta iyo amniga sida xatooyada iwm, waxaa loo cuskan karaa xeerka ciqaabta.
j) Codsaduhu dib ayuu u soo codsan karaa lambarada ama diiwaan-galinta shabakadda internet-ka uu dalbanayo, isagoo dib-u-habayn ku soo samaynaya qodobadii iyo sababihii loogu diiday soona waafajinaya habraaca Wasaaradda.
x) Haddii ay Wasaaraddu diido codsiga bixinta lambarada ama diiwaan-gelinta shabakadda adeegga internet-ka si waafaqsan Xeerkan, Wasaaraddu waxay ku soo saaraysaa go'aan qoraal ah, iyadoo ku caddaynaysa sababta keentay diidmada.

## Qodobka 28-aad
## Xeer-nidaaminta Lambarada

1. Wasaaraddu waxay soo saari kartaa xeer-nidaamin lagu horumarinayo ujeeddooyinka xeerkan, nidaaminta lambarada iyo shabakadaha internet-ka, iyadoo tixgelinaysa siyaasadda Isgaarsiinta.
2. Wasaaraddu waxay awood u leedahay inay soo saarto xeer-nidaamiyeyaal lagu dhaqayo lambarro, adeegyo khaas ah oo ay adeeg bixiyaasha laga doonayo in ay hirgaliyaan, iyadoo la dhawrayo maslaxadda guud iyo midda gaarka ah, sida lambarada adeegga deg-degga ah iyo kuwii kale ee loo arko inay yihiin dan-guud.
3. Haddii Wasaaraddu soo saarto go'aan ah in adeeg bixiyaashu ay siiyaan macaamiishooda adeeg lambar guud xaaladaha deg-degga ah ee dhammaan laga isticmaali karo si loo



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

dhiiri galiyo danta guud waxay adeeg bixiyaashu bixinayaan lambarro degdeg ah oo khaas ah kuwaas oo ka shaqayn kara Puntland oo dhan.

## Qodobka 29-aad
## Xuquuqda Shirkadaha iyo Maalgashadayaasha

Si waafaqsan shuruucda maalgashiga dalka waxaa la dhiiri-gelinayaa, lana dhawrayaa xuquuqda shirkadaha Isgaarsiinta iyo guud ahaan maalgashadayaasha, waxaana la ilaalinayaa jiritaankooda.

## Qodobka 30-aad
## Oggolaanshaha Qalabka Isgaarsiinta

1. Wasaaraddu waxay diiwaan-galinaysaa hay'adda loo oggaalado in la siiyo ruqsadda halbeegga shaybaarka qalabka Isgaarsiinta.
2. Wasaaraddu waxay dajinaysaa siyaasadda iyo halbeegyada loo adeegsanayo shaybaarka qalabka.
3. Cid kasta oo wadani ah waa keeni kartaa qalabka isgaarsiinta, markay fasax ka hesho Wasaaradda.

## Qodobka 31-aad
## Xaqa Marinka Adeeg-bixiyaha

1. Ruqasadlaha bixiya adeeg Isgaarsiineed wuxuu xaq u leeyahay inuu gelin karo qalabkiisa Isgaarsiineed dhulka loo qoondeeyey marka uu dhisayo, waana inuu Wasaaradda u soo gudbiyaa naqshad caddaynaysa meesha uu xarigga marinayo ama uu gelinayo qalabka Isgaarsiinta.
2. Ruqsadlaha bixiya adeegga isgaarsiinta waxaa xaq loogu leeyahay inuu mag-dhaw ka bixiyo dhiba uu u gaystay hantida gaarka ah iyo tan guud, markii ay ku caddaato.
3. Wasaaraddu waxay awood u leedahay inay go'aan ka gaarto, iyadoo marinaysa waddooyinka sharciga wixii is af-garan waa ah ee ka dhasha isticmaalka xaqa marinka uu adeeg bixiyuhu xaqa u leeyahay.

### Qodobka 32-aad
### Helitaanka Adeeg Isgaarsiineed oo Baahsan

1. Adeeg bixiyaasha iyagoo kaashanaya Wasaaradda waxay u hawl-galayaan in dad weynaha ay gaarsiiyaan baahida ay u qabaan isgaarsiinta gaar ahaan magaalooyinka, tuulooyinka, miyiga iyo meel walba oo ay baahi isgaarsiineed ka jirto.
2. Wasaaraddu waxay xil iska saaraysaa helitaanka baahida isgaarsiinta dadwaynuhu u baahan yihiin.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 33-aad

## Tartanka Suuqa Xorta Ah ee Isgaarsiinta

Waxaa u furan adeeg-bixiyeyaasha isgaarsiinta tartan ganacsi oo xor ah, iyadoo aan la jebinayn Xeerka Isgaarsiinta, Wasaaradduna waxay kormeeraysaa, in dhammaan adeeg-bixiyaashu u hoggaansameen shuruucda tartanka xorta ah, iyadoo mar walba la ilaalinayo hannaanka caddaaladda.

## Qodobka 34-aad

## Ku Takrifalidda Awoodda Suuqa

1. Waxaa ka reebban ruqsadle kasta oo bixiya adeeg isgaarsiineed, inuu ku kaco fal ujeeddadiisu tahay in wax lagu yeeleeyo ama hoos loo dhigo tartanka suuqa xorta ah.
2. Haddii adeeg bixiye Isgaarsiineed ay ku caddaato in uu ku kacay falal ujeeddadoodu tahay khasaarin hantiyeed oo suuqa ganacsiga isgaarsiinta ku yimaada, Wasaaraddu waxay qaadaysaa tallaabooyinka soo socda;

b) Ganaax lacageed oo ay Wasaaraddu xaddiddo iyadoo tix-galinaysa wax yeelada uu suuqa u geystay.

t) Haddii waxyeelada uu gaystay falkaasi ka dhalan karto dhibaato loo gaystay cid kale, waxaa loo gudbin karaa maxkamadda awoodda u leh, si ay go'aan uga gaarto fal-danbiyeedkaas, ciqaabta ku habboon iyo in ay xaddiddo mag-dhowga u qalma khasaaraha uu geystay.

## Qodobka 35-aad

## Faafreebka

1. Ruqsadle kasta oo bixiya adeeg Isgaarsiineed wuxuu mas'uul ka yahay anshaxa isticmaalka adeegga ay bixinayaan, waxayna faaf-reeb ku samayn karaan dadka u isticmaala waxyaalaha ka soo hor jeeda Shareecada Islaamka iyo dhaqanka suuban ee Soomaalida.
2. Anshaxa suuban waxaa hal-beeg u noqonaya mabaadi'da Shareecada Islaamka iyo Dhaqanka suuban ee bulshada.
3. Wax kasta oo ka hor-imanaya mabaadi'da Shareecada Islaamka iyo dhaqanka suuban ee bulshada, waxay shirkadaha Isgaarsiintu ka qaadi karaan tallaabo anshax marin iyo in la xiro isticmaalka adeegga haddii cidda ku xad-gudubtey anshaxa suuban ay joojin weydo isticmaalkaas.
4. Shirkaddu waxay si qoraal ah ku soo war-gelineysaa Wasaaradda go'aanka ama tallaabooyinka anshax marineed ee ay ka qaaday cidda xad-gudubka samaysay.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 36-aad
## Diiwaangelinta-lafta (Sim card)

1. Shirkadaha isgaarsiintu waxay diiwaangelinayaan dhammaan dadka iska leh lafaha (Sim-cards) talefoonka iyo kuwa la siinayo lafaha (Sim-cards) marka uu xeerkani dhaqan-galo, si loo sugo mulkiyadda iyo xuquuqda gaarka ah ee macmiilka.
2. Si loo fuliyo farqada 1-aad ee qodobkan waxaa lagama maarmaan ah inuu haysto macmiilku wax sugi kara aqoonsiga shakhsiga.

## Qodobka 37-aad
## Hirgalinta Xeerkan

1. Wasaaraddu waxay raacaysaa qaab daah-furan waafaqsanna xeerka isgaarsiinta.
2. Wasaaraddu waxay awood u leedahay in ay kormeerto fulinta xeerkan iyo inay ganaax saarto ciddii ku xad-gudubta xeerkan.

## Qodobka 38-aad
## Ganaax

Shirkad kasta oo jebisa heshiisyada shirkadaha dhexdooda ama u hoggaansami weyda xeerkan iyo xeernidaamiyeyaashiisa, waxay mutaysanaysaa;

1. Ganaax lacageed oo ay Wasaaraddu jaangoysey kuna soo saartay xeernidaamiyaha xeerkan, kaasoo u dhigma khasaaraha ay geysatey iyadoo Wasaaraddu u saareyso guddi soo qiimaysa.
2. Haddii ay shirkaddu u hoggaansami weydo ganaaxyada ku xusan farqada 1-aad waxaa Wasaaraddu kala noqon kartaa ruqsadda ay ku hawl-geleyso.
3. Ganaax lacageed ayaa la saarayaa shirkaddii u hoggaansami weyda tallaabooyinka Wasaaradda, waxaana loo gudbinayaa maxkamadda awoodda u leh.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 39-aad
## Iska hor-imaadka Danaha Isdiidan
## (Conflict of Interest)

Madaxda sare ee Wasaaradda iyo qof kasta oo ka tirsan shaqaaleheeda waxaa ka reebban ka shaqeyn arrin ka hor imanaysa ama saamayn ku yeelan karta shaqada ay u hayaan Wasaaradda sida;

1. Danahooda dhaqaale ee gaarka ah.
2. Danahooda dhaqaale ee la xiriira qof ka mid ah qoyskooda ama qaraabadooda.
3. Danahooda dhaqaale ee shirkadahooda ganacsi ama qof uu shirko la yahay.
4. Danno-dhaqaale ee Hay'ad walba uu ka yahay mulkiile, saamile, mas'uul ama wakiil.
5. Danno-dhaqaale ee Hay'ad walba uu kula heshiiyey inuu la shaqeeyo ama wada hadal shaqo kula jiro. xaaladahan oo kale haddii ay dhacaan waa inuu ka tanaasulo danahaas ama ka cudurdaarto ka qayb kalka go'aaminta arrimaha danahaas khuseeya ee Wasaaradda horyaal.
6. Waxaa reebban in Wasiirka ama xubin ka tirsan shaqaalaha Wasaaraddu in uu ku yeesho lahaansho toos ah shirkad hoos tagta awoodda iyo arrimaha loo igmaday Wasaaradda.
7. Mas'uul kasta oo ay ku caddaado inuu ku xad-gudbay qodobada kor ku xusan waxaa laga qaadayaa tallaabo sharciga waafaqsan.

## Qodobka 40-aad
## Burin

Waxaa la buriyey Xeer kasta oo Isgaarsiineed oo aan la socon karin ama ka hor imaanaya Xeerkan.

## Qodobka 41-aad
## Dhaqan-galka

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynaha Dawladda Puntland Saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Puntland.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

LIFAAQA KHIDMADAHA ISGAARSIINTA

**Shirkad kasta oo isticmaalaysa adeegyada Isgaarsiinta waxay bixinaysaa khidmadahan hoos ku qoran;**

| L.r | Magac/Tilmaan | Khidmadda |
|---|---|---|
| 1 | Ruqsadda Isgaarsiinta Puntland | $200,000 |
| 2 | Cusboonaysiinta Ruqsadda Isgaarsiinta Puntland | $10,000.00 |
| 3 | Ruqsadda Saldhiga isgaarsiinta xeebaha ee gaadiidka laga hago | $100.00 |
| 4 | Cusboonaysiinta Ruqsadda Saldhiga Isgaarsiinta Xeebaha ee gaadiidka laga hago | $100.00 |
| 5 | Ruqsadda nooca Ateennada (VSAT) anteeno hay'duhu ku shaqaystaan oo u gaar ah | $2,000 |
| 6 | Cusboonaysiinta Ruqsadda nooca Ateennada (VSAT) anteeno hay'duhu ku shaqeystaan oo u gaar ah | $1,000 |
| | **Khidmad Bille ah** | |
| 7 | Iibka Guud ee bil walba (Total sales per month) | 5% |
| 8 | Canshuurta Mushaharka Shaqaalaha | 6% |
| | **Khidmadda Isticmaalka Hirarka oo Bille ah** | |
| 9 | Hirarka(frequencies) shirkadaha isgaarsiinta nooca A :(GSM-900) halkii | $100.00 |
| 10 | Hirarka(frequencies) shirkadaha isgaarsiinta nooca B :(1800) | $50.00 |
| 11 | Hirarka(frequencies) ka kale | $50.00 |

FIBER OPTIC

| | | |
|---|---|---|
| 1 | Ruqsadda cusub ee Fiber Optic cable | $300,000 |
| 2 | Cusboonaysiinta Ruqsadda ee Fiber Optic cable | $20,000 |

**Saldhigyada Raadiyeyaasha (HF/VHF) Isgaarsiinta**
Marka laga reebo UN-ka, raadiye kasta waxaa laga qaadayaa khidmadaha hoos ku qoran:

| L.r | Magac/Tilmaan | Diiwangalin | Sannadle |
|---|---|---|---|
| 1 | Ruqsadda Raadiye warbaahin ee cid kasta. | $200.00 | $100.00 |
| 2 | Ruqsad raadiye Shirkadaha laamaha ku leh Puntland | $250.00 | $150.00 |
| 3 | Ruqsadda idaacadaha (Radio station) | $300.00 | $200.00 |

**BOOSTADA**

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1 | Ruqsadda Boostada | $200.00 | |
| 2 | Cusboonaysiinya Ruqsadda Boostada | $100.00 | |



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

**Madbacadaha Dalka iyo Wargaysyada**

| L.r | Magac/Tilmaan | Diiwaangalin | Sannadle |
|---|---|---|---|
| 1 | Ruqsadaha Madbacadaha Heerka 1-aad | $400.00 | $200.00 |
| 2 | Ruqsadaha Madbacadaha Heerka 2-aad | $250.00 | $100.00 |
| 3 | Ruqsadda wargaysiyada todobaadle, bille iyo ka badan | $100.00 | $50.00 |

**Diwaangalinta Warbaahinta madaxa Bannaan**

| L.r | Magac/Tilmaan | Diiwaangalin | Sannadle |
|---|---|---|---|
| 1 | Ruqsadda Ururada warbaahinta madaxa-bannaan Sannadle | $500.00 | $250.00 |
| 2 | Mac'hadyada saxaafadda madaxa-bannaan Sannadle | $200.00 | $100.00 |
| 3 | Ruqsadaha gawaarida wax lagu xayaysiiyo | $50.00 | $30.00 |

**Telefishinada iyo Adeegga Xiriirka la leh**

| L.r | Magac/Tilmaan | Khidmadda Diiwaangalinta | Cusboonaysiin |
|---|---|---|---|
| 1 | Xarun Telefishin Caalami ah (Short-wave, FM, Satellite – Frequencies in KHZ-2340,-5965-17760-21,660) iyo wixii ka sareeya | $1,000.00 | $500.00 |
| 2 | Wakiillada TV-yada gaarka ah iyo wakalaadaha wararka madaxa bannaan. | $500.00 | $250.00 |
| 3 | Khidmadda Telefishin Local Frequency Modulation (FM) 108-700 KHZ oo laga daawado magaalada uu yaallo oo keliya sannadle | $500 | $300.00 |
| 4 | Xarunta **Cable BOX:** Hirar la arurshay (frequency box) ee kanaalada kala duwan ciyaaraha, filimaanta, wararka iyo barnamijyada kale | $2,000.00 | $1,000.00 |
| 5 | Xarunta **Cable BOX** Satellite-ka ah Khidmad Bille ah | | $200 |
| 6 | Ruqsadda guud ee xayaysiinta shaashadaha muuqaalka mid kasta ee cusub | $50.00 | $30.00 |
| 7 | Ruqsada shirkadaha filimada soo saara (film producers) ee cusub | $150.00 | $100.00 |
| 8 | Ogyeysiisyada SMS-ka Shirkadaha Isgaarsiinta | 5% | |
| 9 | Xayaysiiska TV-yada | 10% | |

XAFIISKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR